



## Curtis Wilson Jr. ay leedahay Benson oo lagu maamuusay dhacdaddii Dr. Martin Luther King Jr.

Marka ay noqoto maamulaha Dugsiga Sare ee Benson Curtis Wilson Jr., helitaanka Abaalmarinta Inta nolosha Qofka ka hartay waxay ahayd mid xiiso leh. Si uu helo abaarmarinta isaga oo jooga goobta qadarinta sanadlaha ah ee Dr. Martin Luther King Jr. waxay maamuuska u yeeshay macno kale.

“Dhammaanteen waxaanu leenahay fikrado kala duwan marka ay noqota sida uu saameynta inoogu sheegay,” ayuu Wilson ka sheegay halyaya xuquuqda madaniga ah astaanta u ahaa. “Aniga ahaan, waxay ii ahayd samaynta isbeddel gaarsiisan heer weyn. Waaan dareemayaan maamule ahaan, in aan dugsiga ka samayn karo isbeddelo saameynaya kuwa badan oo ka tirsan ardayda Benson, oo wax loogu hore loo sii wado marka ay noqoto ardayda midabyada kala duwan leh.”

Wilson wuxuu Isniintii abaalmarinta helay isaga oo jooga goobtii qadarinta sanadlaha ah ay soo abaabuleen Ururka Farshaxanka Adduunka taasi oo ku saabsanay Maalinta Dr. Martin King Luther Jr iyada ka dhacday Highland Christian Church. Iyada oo ay ku soo biirtay xaaskiisa, Yushonna Wilson, iyo wiilka uu dhalay ee ugu yar, Andrew, Wilson wuxuu aqbalay maamuuska sanad ka dib markii [loo magacaabay Maamulaha Dugsiga Sare ee Oregon ee Sanadka](#). Isaga oo hoos imaanaya maamulka Wilson, Benson – oo leh isqoris ay boqolkiiba 67 yihiin midabyada kala duwan leh – wuxuu gaaray guul ah heerarka qalin jabinta oo sareysa iyo heerarka ka tegida dugsiga oo hoose.

“Waxay ahayd mid farxad leh in la aqoonsado isla markaana la maamuuso dhammaan shaqada aad halkan ka qabataan ee loogu talagalay degmada,” ayuu sheegay Wilson, oo sanadkiisii lixaad jooga Benson. “Waxaan haynaa shaqo aan macadcelin lahayn, sidaa darteed aad ayaan ugu farxay in aan halkaasi istaago oo aan ogaado in shaqada aan ka qabanayay degmada muddo ku dhow 30 sano la aqoonsaday.”

Dhacdada waxaa lagu soo bandhigay bandhigyo ka kala socday barnaamijyo kala duwan oo ay leeyihii Dugsiyada Dadweynaha Portland, oo ay ka mid yihiin Muusikada Bravo oo ka socday Dugsiyada Cesar Chavez, Barnaamijka Muusikada Maraykanka oo ka socday Qoob ka cayaarayaasha Dugsiga Sare ee Vernon iyo Jefferson.

[Fiiiri sawirro ka socda dhaccada](#)